

Qofka ku
cusub
Iswiidhan

somaliska

Hanuuninta Dadweynaha

Miyaad ku cusub tahay Iswiidhan? Markaas waxaad xaq u yeelan kartaa kooras 60 saacadood ah oo ku saabsan barashada bulshada, kooras bilaash ah oo ku saabsan bulshada iswiidhishka. Waxaad aqoon u yeelanaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, dimuqraadiyada iswiidhishka iyo sida bulshada u dhisan tahay. Koorastu waxay ku siinaysaa macluumaad muhiim ah – Si aad u hesho bilow fiican Iswiidhan!

Wacyigalinta bulshada waxa lagu bixinayaa afkaaga hooyo, ama luqad kale oo aad si wanaagsan ugu hadasho. Koorasku wuxuu qofka cusub ka caawinayaa inuu si degdeg ah u galo suuqa shaqada iyo nolosha bulshada. Waxaad haysataa fursad aad ku dhegaysato, ku weydiiso ama ku dooddo.

Koorsadu waxay ka kooban tahay

Gobolka Stockholm, jiheynta bulshadu waxay u qaybsan tahay afar cutub:

- Ku cusub Swiidhan
- Shaqo iyo Waxbarasho
- Dimuqraadiyad
- Caaruurta iyo qoyska

Yaa kooraskan geli kara?

Jiheynta bulshada waxa loogu talo galay dadka u dhexeeya 18 ilaa 64, ee ku cusub Iswiidhan, ee ku jira barnaamijka etableringsplan, xafiiska shaqada ama qoys ahaan lagu keenay kaasoo ka diiwan-gashan degmo iswiidhan in ka yar seddex sano.





Jihaynta bulshada lama siiyo qofka ah:

- muwaadin haysta dhalasho EU ama Swiserlaand
- dhigta dugsiga sare
- muhaajir shaqo u yimid
- arday waxbarasho u yimid ama profesor cilmi baadhe

Marka koorasku dhamaado qof walba waxa la siinayaa shahaado.

Dalabka

Nala soo xidhiidh haddii aad is qoraysid kooraska ama aad suaalo ku saabsan jihaynta bulshada hayso.

E-post: sam@stockholm.se

Xarunta wacyigalinta bulshada ee gobolka Stockholm

(Centrum för samhällsorientering i Stockholms län) waa gole ay wadaagaan degmooyin badan ee gobolkan. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan soo booqo boggayaga internetka ee luqada-ha faraha badan ku qoran **www.nyistockholm.se**.

Xarunta wacyigalinta bulshada ee gobolka Stockholm
Telefon 08-508 35 443 | **Epost** sam@stockholm.se
Bogga Internetka www.nyistockholm.se



**CENTRUM FÖR
SAMHÄLLSORIENTERING**
I STOCKHOLMS LÄN